# Shuruudaha Tababarka iyo Jadwalka Dhamaystirka

Ka dhigo kani dhukumenti kuu soo-koobaya nuxurka adeega hore, tababarka, iyo shuruudaha adeega tababarka ee dhammaan doorarka barnaamijyada outdoor nature-based (arimaha deegaankaa, ONB) ee daryeelka caruurta.



**Qoraalo la xasuusnaanayo:**

- Adeeg-bixiyayaasha ONB waa inay dhammeystiraan hubinta asaasiga ah ee waaxda iyagoo raacaya WAC 110-06. Wixii macluumaad dheeriya ee onlaayn ah, booqo **http://apps.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-06**.
- Adeeg-bixiyayaasha ONB, oo ay ku jiraan mutadawiciintu, waa inay bixiyaan dhukumenti uu saxeexay 12 bilood ee ugu danbeeyey xirfadle daryeel caafimaad oo liisan ka haysta baadhista qaaxada (TB) ama daaweynta (fiiri ONB Heerarka Halbeega 0105, qeybta 3). Wixii macluumaad dheeriya oo onlaayn ah, booqo **www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/Outdoor_Nature_Based_Child_Care_Touchstone_Standards.pdf**.
- Dhammaan adeeg bixiyaashu waa inay isla diiwaan gashaan diiwaanka shaqaalaha ee elektarooniga ah (MERIT) kahor intaan la siin ruqsada ama kahor intaysan la shaqayn carruur aan lagu kormeerayn.

## Dulmarka shuruudaha Tababarka

Shuruudaha Adeega Hore – ONB Heerarka Halbeega Daryeelka Caruurta 0105

Shuruudaha Tababarka – ONB Heerarka Halbeega Daryeelka Caruurta 0106

Adeega Tababarka – ONB Heerarka Halbeega Daryeelka Caruurta 0107

**Dulmarka shuruudaha TababarkaShaxda 1: Dulmarka Shuruudaha Tababarka**

| Doorka | Shuruudaha Tababarka | Shuruudaha Gudaha Shaqada |
|---|---|---|
| Agaasime<br>Kalkaaliye Agaasime<br>Kormeeraha Barnaamijka<br>Agaasimaha Barnaamijka<br>Agaasimaha Goobta | • Tababarka Ruqsada (hadduu jiro)<br>• **ONB Aasaasiyaadka Daryeelka Caruurta***<br>• Gargaarka Degdega/CPR<br>• Xanuunada Dhiiga ku Dhasha<br>• Ruqsada Bixiyaasha Cuntada (hadday jiraan) | • Tababarka Sanadlaha ah ee Shaqada Lagu dhex sameeyo ee 10 saacadood ah<br>• Dhaqamada Hogaaminta<br>• Kooxaha Dugsiga Barbaarinta iyo Da'aha Isku-Dhafan: EQEL |

*ONB Aasaasiyaadka Daryeelka Caruurtu wuxuu daboolayaa tababarka lagu sheegay ONB Heerarka Halbeega 0106 qeybaha 4-7. Tan waxaa ku jira waxyaabaha soo socda: Aqoonsiga iyo Soo Sheegida Xadgudubka (0106 qaybta 4), Diyaar Garoowga Xaaladaha Degdega ah (0106 qaybta 5), U adeegida Carruurta Waajahaaya Hooy La'aanta (0106 qeybta 6), Maaraynta Daawada (0106 qaybta 7)

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES



| Dulmarka shuruudaha TababarkaShaxda 1: Dulmarka Shuruudaha Tababarka | | |
|---|---|---|
| **Doorka** | **Shuruudaha Tababarka** | **Shuruudaha Gudaha Shaqada** |
| Hogaanka Macalimiinta | • **ONB Aasaasiyaadka Daryeelka Caruurta*** <br>• Gargaarka Degdega/CPR <br>• Xanuunada Dhiiga ku Dhasha <br>• Ruqsada Bixiyaasha Cuntada (hadday jiraan) | • Tababarka Sanadlaha ah ee Shaqada Lagu dhex sameeyo ee 10 saacadood ah <br>• Kooxaha Dugsiga Barbaarinta iyo Da'aha Isku-Dhafan: EQEL |
| Kaaliyaha Macalinka | • **ONB Aasaasiyaadka Daryeelka Caruurta*** <br>• Gargaarka Degdega/CPR <br>• Xanuunada Dhiiga ku Dhasha <br>• Ruqsada Bixiyaasha Cuntada (hadday jiraan) | • Tababarka Sanadlaha ah ee Shaqada Lagu dhex sameeyo ee 10 saacadood ah <br>• Kooxaha Dugsiga Barbaarinta iyo Da'aha Isku-Dhafan: EQEL |
| Kaaliye | • **ONB Aasaasiyaadka Daryeelka Caruurta*** <br>• Xanuunada Dhiiga ku Dhasha <br>• Ruqsada Bixiyaasha Cuntada (hadday jiraan) | N/A |
| Mutadawac | • Xanuunada Dhiiga ku Dhasha <br>• Tababarka Caafimaadka iyo Badqabka – Aqoonsiga iyo Soo Sheegida Xadgudubka, Diyaar Garoowga Xaaladaha Degdega ah, U adeegida Carruurta Waajahaaya Hooy La'aanta | N/A |

*ONB Aasaasiyaadka Daryeelka Caruurtu wuxuu daboolayaa tababarka lagu sheegay ONB Heerarka Halbeega 0106 qeybaha 4-7. Tan waxaa ku jira waxyaabaha soo socda: Aqoonsiga iyo Soo Sheegida Xadgudubka (0106 qaybta 4), Diyaar Garoowga Xaaladaha Degdega ah (0106 qaybta 5), U adeegida Carruurta Waajahaaya Hooy La'aanta (0106 qeybta 6), Maaraynta Daawada (0106 qaybta 7)

## Jadwalka Dhamaystirka Tababarka

Shuruudaha Adeega Hore – ONB Heerarka Halbeega Daryeelka Caruurta 0105

Shuruudaha Tababarka – ONB Heerarka Halbeega Daryeelka Caruurta 0106

**Shaxda 2 aad: Jadwalka Dhamaystirka Tababarka**

| Shardiga | Goorma ayey khasab tahay in shuruuda tababarkan la dhammeystiro? | Sidee ayaa shuruuda tababarkani loo dhammeystirayaa? |
|---|---|---|
| Tababarka Liisanka | • Kahor intaan qofku la wareegin masuuliyada barnaamijka.<br>• Kani mar qudha ayaa la dhammeystirayaa. | • DCYF ayaa ku bixisay onlaayn 2022.<br>• DCYF ayaa u bixisay toos: ka hubi onlaaynka **www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/licensed-provider**. |
| ONB Aasaasiyaadka Daryeelka Caruurta* | • Kahor intaan lagu siin ruqsad.<br>• Kahor intaadan u adeegin carruur aan lagugu kormeerayn.<br>• Kani mar qudha ayaa la dhammeystirayaa. | La dhammeystir Aasaasiyaadka Daryeelka Caruurta ONB tababare gobolku ansixiyey.<br><br>Dhammayso Tababarka Caafimaadka, Badqabka iyo Nafaqada ee ECED&107 (qayb kamid ah Shahaadada Koowaad) kaasoo buuxinaaya shardiga Tababarka Aasaasiyaadka Daryeelka Carruurta. |
| Xanuunada Dhiiga ku Dhasha | • Kahor intaan lagu siin ruqsad.<br>• Kahor intaadan u adeegin carruurta.<br>• Tababarkaan waxaa loo sameeyaa sida ay amarto Department of Labor & Industries (Waaxda Shaqaalaha iyo Warshadaha). | Waydii wakaaladaha maxaliga ee tababarkaan bixiya. |
| Gargaarka Degdega/CPR<br><br>**OGOW:** Wilderness Survival First Aid/CPR waa loo baahan yahay haddii barnaamijku soconaayo wax ka badan sodon daqiiqo daryeelka caafimaadka ee xaaladaha degdega ah. | • Kahor intaadan u adeegin carruur aan lagugu kormeerayn.<br>• Tababarkaan waxaa loo sameeyaa sida ay amarto Department of Labor & Industries (Waaxda Shaqaalaha iyo Warshadaha). | Waydii wakaaladaha maxaliga ee tababarkaan bixiya. |
| Ruqsada Shaqaalaha Cuntada | • Kahor intaysan u diyaarin ama siin cunto carruurta.<br>• Tababarkaan waxaa loo dhammeystiraa siday amarto waaxda caafimaadka maxaliga ah. | Waaxda caafimaadka maxaliga ah ee deegaankaaga. |

**Shuruudaha Tababarka Mutadawacnimada ah:** Tababarada lagu sheegay Aasaasiyaadka Daryeelka Caruurta ONB Heerarka Halbeega 0106 qeybaha 4-7 awaxa lagu daray Asaasiyaadka Da'da Dugsiga. Haddii mutadawacu aanu dhammeystirin Aasaasiyaada Da'da Dugsiga (oo aan looga baahneyn mutadawiciinta) mutadawucu wuxuu kaga dhammeystiri karaa tababaradan madaxabanaan bilaash onlaaynka DCYF.

*Haddii aad horay u shaqaynaysay wakhtigii sharcigan dhaqan galay, tababarka Aasaasiyadka Daryeelka Carruurta ONB waa inaad ku gashaa sadex billood gudahood laga bilaabo marka qaybtaan dhaqan gasho. Dhammaan shaqaalaha cusub waa inay dhammeystiraan Aasaasiyaadka Daryeelka Caruurta ONB kahor intaanay la shaqeyn caruurta aan la kormeerayn.

## Shuruudaha Tababarka Gudaha Shaqada

ONB Daryeelka Caruurta Heerarka Halbeega 107

**Qoraalo la xasuusnaanayo:**

- Adeeg-bixiyayaasha ONB waa inay dhammeystaan 10 saacadood oo tababarka shaqada dhexdeeda lagu baxsho ee sanadlaha ah.
- Tababarka-gudah shaqada ayaa qasab ah kadib 12 billood oo qofku shaqaynaayay.
- Shuruudan tababarka sanadlaha waxay ku saleysan tahay jadwalka sanadka ee DCYF (Janaayo 1 – Diseembar 31).
- Shanta saacadood ee adeega tababarka waxa la sameyn karaa laga bilaabo hal sanad jadwal ah ilaa jadwalka sanadka xiga.
- "Saacadaha STARS" ama "tababarka gobalku fasaxay" ayaa ah erayo kale oo badanaa loo adeegsado tababarka "gudaha shaqada."



**Shaxda 3 aad: Shuruudaha Tababarka Gudaha Shaqada**

| Shuruudaha Adeega | Goorma ayey khasab tahay in shuruuda tababarkan la dhammeystiro? | Sidee ayaa shuruuda tababarkan loo buuxiyey? |
|---|---|---|
| Tababarka Gudaha Shaqada | Kadib dhammeystirka ONB Aasaasiyaadka Daryeelka Caruurta:<br>• Toban saacadood oo tababarka gudaha shaqada ah ayaa la sameeyaa sanad kasta (Janaayo 1 – Diseembar 31).<br>• Hogaanka maamulka (agaasimayaasha, kalkaaliyaha agaasimaha, kormeerayaasha barnaamijka, agaasimayaasha barnaamijka, iyo agaasimayaasha goobtu) waa inay dhammeystaan 10 saac oo Barashada Hogaanka* 3 sano oo kasta. | • Tababar gobalku aqoonsan yahay.<br>• Tababarada kale waa inay waafaqaan Kartiyada Aasaasiga ah ee Gobalka Washington.<br>• Koorsooyinka kuleejka ee waafaqsan Kartiyada Aasaasiga ah ee Gobalka Washington. |

*Tababarka xirfadaha hogaaminta waxaa ku jira Kartiyada Aasaasiga ah ee Gobalka Washington ee soo socda: qorshaynta iyo hormarinta barnaamijka, hormarinta xirfada iyo hogaaminta.

*Haddii aad rabto nuqullo dukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan la xidhiidh DCYF Constituent Relations (Xidhiidhada Qaybaha) (1-800-723-4831 | 360-902-8060,* ***ConstRelations@dcyf.wa.gov****).*

DCYF PUBLICATION EPS_0070 SM (10-2021) Somali